

Caawimaad ayaan ku siineynnaa

Goobta looga hortago ka-ganacsiga dadka waxaa ka socda waxqabadyo gaar ah oo lagugu caawinayo, xataa marka aadan wax caawimaad ah ka helin bulshada. Waxaan sidoo kale barnaamijkaas ku qaabbilnaa carruurta. Caawimadaha aan bixinnaa waa kuwo lacag-la'aan ah oo aysan wax shuruud ahi ku xirnayn - iyadoo aan loo egeeyn inaad lswiidhen sharci ku leedahay iyo in kale, bolliiskana wax wadashaqayn ah lama lihin. Waxaan caawimadahaas ku salaynnaa baahidaada iyo awooddayada – annagoo aan marnaba ogeysiineyn hay'adaha haddii aadan adigu sidaan codsan.



PLATTFORMEN MOT MÄNNISKOHANDEL

Ma dooneysaa caawimaad ama warbixin dheeraad ah?

La xiriir *Xarunta ka-hortagga ka-ganacsiga dadka* oo barta internet tahay

www.manniskohandel.se

E-mailku waa info@manniskohandel.se

FIIRO GAAR AH! Wixii xaalad degdeg ah ka wac boliiska telefoonkaan 112.

Xoghaynta *Qaranka ee ka-hortagga dhilleysiga iyo ka-ganacsiga dadku* waxay talooyin iyo wargelin siisaa hay'adaha dowladda, maamulada degmooyinka iyo ururada samafalka oo qaabbila dadka dhibaatooyin noocaas ah loo geystey.

Wac **Hotline 020-390 000**.

GOOBTA KA-HORTAGGA KA-GANACSIGA DADKA

WAXAAN SIINNA WAX U BEDDELA NOLOSHA AY KU JIRAAN

Dhammaan dadku waxay xaq u leeyihiin nolol sharaf leh oo xor ka ah khasab iyo haysasho.

- **Haddii aysan** suurtagal kuu ahayn inaad kala xaajooto shuruudaha shaqa ama aadan mushahar helin ama lagu diidey inaad shaqada iskaga tagto oo ka ruqseysdato.
- **Haddii aadan** dareensanayn inaad xor u tahay saamaynta noloshada ama aadan adigu ka talin karin jirkaaga ama oogadaada.

Markaas taasi ma ahan wax la aqbali karo!

Waxayna noqon kartaa ka-ganacsi dad.

SOOMAALI / SOMALISKA

Waxyaalahaan ayaa ka mid ah ka-ganacsiga dadka

Ma lagugu khasbay ama khiyaanay inaad jirkaaga iibiso ama mushahar la'aan shaqayso ama dembiyo kale gasho ama tuugsato? Waa ka-ganacsiga dadka Mana ahan wax la aqbali karo. Dhammaan dadku waxay xaq u leeyihiin inay xorriyad ku noolaadaan.

Qofna xaq uma leh in uu dadka kale ka faa'iideysto ama ku raaxeysto. Qofkii arrimahaas u geysta qof kale wuxuu jebinayaa sharciga lswiidhen iyo xeerka xuquuqda aadanaha.



Haddaba maxaad xaq u leedahay?

Waxaad xaq u leedahay in lagu caawino haddii lagaa ganacsaday. Waxaad xaq u leedahay inaad hesho:

- ✓ Hoy ammaan ah oo kugu habboon
- ✓ Waxyaalaha ay ka mid yihiin cunto iyo dhar
- ✓ Daryeel caafimaad oo lagama maarmaan ah
- ✓ Caawimaad xagga maskaxda
- ✓ Warbixino iyo talooyin xagga sharciga
- ✓ Turjubaan xag af iyo xag qoraalba

Hadafkayagu waa inaad hesho xuquuqahaas aadanaha. Waxaan iska la shaqaynnaa ururka *Goobta ka-hortagga ka-ganacsiga dadka*. Waxaad si wadajir ah u dooneynnaa inaan caawimaad iyo badbaadin siinno adiga, carruurtaada iyo qoyskaaga. Dhammaan caawimadahaasi waa lacag la'aan, kuna salaysan baahida aad qabto.

Qaarkii caawimaadda helay:

Evelina oo ka timid *Bulgaariya* waxaa lagu khasbay inay shaqayso maalin walba mushahar la'aan. Iyada ayaa iskeed u timid *xarunta caawimaadda* si ay uga baxdo xaaladdaas adag. Waxaa laga caawinay meel ammaan ah oo ay degto oo ku nasato iyo cunto iyo dhar. Waxaa loo sheegay xuquuqda ay leedahay iyo fursadaha ay heli karto.

Kadib dabagal boliisku ku sameeyey nimanka galmada iibsada ayey heleen *Nadja* oo ka timid *Roomaaniya*. *Nadja* waxaa la dejiyey meel ay kaga caafimaaddo dhibaatooyinkii ka soo gaaray *dhilleysigii* lagu khasbay. Waxaa kaloo caawimaad la siiyey carruurteeda si ay uga bogsadaan wixii ay soo arkeen oo soo dareemeen. *Nadja* waxaa laga caawinay inay dacwad u gudbiso bolliiska.

Anxa waa gabar *Albaaniya* u dhalatay. *Koox burcad* ah ayaa inta ay xoog ku soo qabsadeen oo daroogeeyeen ku khasbay inay dhilleysato. Iyadoo uur leh ayey wiilkeeda 3 sano jirka ah u la soo carartay lswiidhen. *Xarunta ayaa* ka caawintay meel ay degto, iyo inay hesho caawimaad la hadal, warbixino, cunto iyo habka loo maro magangelyadoonka.